# Dugsiyada Dadweynahah Portland (PPS): Qorshahayaga aan Ku Maalgalineyno Koontada Ardayda

Qoysaska iyo Shaqaalaha Qaaliga ah,

Waxa aanu ku jirnaa marxaladihii ugu dambeeyey ee aan kor ugu qaadaney codsigayaga maalingalinta Koontada Ardayda (SIA). Sida aad ka warqabtaan, Koontada Ardaydu waxa ay ka mid tahay Xeerka Guusha Ardayda, ee sanadkii la soo dhaafay ay meelmariyeen Xeer Dejiyaasha Gobolka Oregon. Maalingalinta Koontada (SIA) waxa ay loo sameeyey in wax lagaga qabto baahiyaha caafimaadka anshaxa ama maskaxda, iyo sidii loo kordhin lahaa sidii ay ardaydu u noqon lahaayeen kuwa guuleysta kuwaasi oo ay ka mid yihiin ardayda taariikh ahaan la siin baahiyahoogii waxbarasho ee ay u baahnaayeen. Dugsiyada Dadweynaha Portland waxa ay u qoondeeyeen Koontada Ardayda sanad-dugsiyeedka wuxuu qiyaastii noqonayaa $39 malyuun oo doolar.

Waxa aanu dhowrkii bilood ee la soo dhaafay xidhiidho la sameynay bulshooyinka, maamulayaasha iyo macalimiinta, Golaheena Waxbarashada iyo saaxiibadaha bulshadeena iyo daneeyaasha, iyada oo ay hoggaamisay wixii aan ka maqalnay oo la jaanqaadaya aragtiyada degmada, sinaanta isirka iyo cadaalada bulshada,qorshaha istaraatijyada PPS, waxa aanu go'aansanay meelaha ugu muhiimsan in aan u qorsheyno maalgalinta sanduuqa koontadayada si aan u siino kala soocid adag dhinaca maalgalinta iskuuladayada ay ka jirto baahida weyni, sidoo kalena aad ku biirino maalgalinta sidii aan u taageeri lahayn ardayda dugsiyada degmada wax ka barata.

Halkan waxaan idiinku iftiimin qaar ka mid ah qorshahayaga Koontada Ardayda (SIA):

- **Tirada ardayda fasalka & saamiga macallinka-ardayda oo aad u fiican (K-12):** Tani waxaa ka mid ah macallimiin dheeraad oo fasalka, la-taliyaal, iyo in la kordhiyo addeegyaasha bulshada iskuulada sidii ay u siin lahaayeen ardayda gargaarka shucuur bulsheedka, waxbarasho shaqsiyeed dheeraad ah.
- **Helitaanka waxbarashada farshaxan badan oo loo siman yahay, gaar ahaan iskuulada bulshooyinkii taariikh ahaan heli jirin addeegyadii ay u baahnaayeen:** Waxaana ka mid ah in la kordhiyo shaqaalaha taageera dugsiyada hoose, heerka dugsiyada dhexe ee darisyada Dugsiga Sarre ee Jefferson, Madison iyo Roosevelt, Macallin gaar ah oo farshaxanka masraxa iyo muuqaalka (TOSA) sidii uu u taageeri lahaa horumarinta Qorshaha Waxbarashada Farshaxanka Guud iyo meelmarintiisa, iyo maalgalinta soo iibinta qalabyada loo baahan yahay.
- **Horumarinta Xirfada Macallimiinta & Qalabka Manhajka:** Waxa aanu soo iibsan doonaa iyada oo aan meelmarin doono, qalabyo tay'adoodu aad u sareyso ee waxbarashada maadooyin fara badan, laga bilaabo qabantiga manhaj cusub ESL/ELD iyo horumarinta u Ballanqaadida Manhajka Caafimaadka oo Suurtagal ah iyo Waxbarashada Jimicsiga.

- **Kor u qaadista taageerada waxbarashada iyo sidii diirada loo saari lahaa ardayda aan helin gargaarkii loogu talogalay iyo wax ka qabashada ardaydeena dhibta u nugul :** Waxaana ka mid ah in la shaqaaleysiiyo macallimiin dheeraad ah iyo khabiiro xirfadlayaal dhinaca maadooyinka iskuulada sida gaarka diirada loo saarayo, kordhinta sidii loo heli lahaa waxbarashada bilowga ah, iyo manhaj khaas ah oo taageera dhaqanka ardayda Maraykan Asalka ah.
- **Ballaarinta maadooyinka la doorto Dugsiyada Dhexe Dhammeystiran iyo K-8:** Shaqaale dheeraad ah oo taageera in lagu biiryo fasalada la doorto ee farshaxanka fanka iyo muuqaalka laguna hirgaliyo deeq lagu daahfurayo 1:1 qalabka barnaamijka ee cusub soona saareen Verson afar iskuul.
- **Kor u qaadista shucuurta bulsho, maskax iyo taageerida caafimaadka anshaxa dhammaan iskuulada degmada :** Waxa aan kor u qaadi doonaa saamiga ardayda iyo la-taliyaasha dhammaan dugsiyada dhexe iyo dhammaan iskuulada diirada la saarayo K-5 iyo K-8, sidoo kale kordhinta tirada shaqaalaha bulshada ee taageeraya dugsiyada sarre, oo ay ka mid yihiin kordhinta shaqaalaha caafimaadka maanka dhammaan K-5/K-8 iyo Hawlgal Ardayda Lagu Siinayo Dhowr Dariiqo oo ay ku Qalin-jabin karaa iskuulada, kordhinta shaqaalaha cilmi-nafsiga si ay u taageeraan maareeyaasha kiisaska, korhdinta sidii qandaraas loola gali lahaa hay'adaha gaar ah oo bixiya taageerada caafimaadka anshaxa iyo maskaxda oo dhaqanka ardayda aad u yaqaana, iyo kordhinta Iaalinta Cadaalada iyo jagooyinka Title IX.
- **Dhaqan ahaan Ardayda u gaar ah & Ballaarinta Iskaashiga Bulshada taageeradooda qoyska:** Waxa aan kordhin doonaa agabka lagula xiriirayo qoyska iyo ardayda u gooni ah dhaqanka, sidii loo sameyn lahaa in ay dusgiyada sarre helaan addeegyo taageerada ardayda dhinaca caafimaadka maskaxda dhibaatadu ka haysato, sidii loo siin lahaa fursado wax lagu barayo ardayda dhinaca hoggaaminta ah iyo hawlaha lagu xoojinayo dhaqanka u gaarka ah.

Tani waa shaqo aad u muhiim ah, sida ay muhiimka u tahay waa aanu kordhineynaa doolar kasta in lagu taageero ardaydeena sida ugu wanaagsan dhammaan dugsiyada degmada. Waxa aanu idinla wadaagi doonaa wixii faahfaahin ah ee soo kordha maalmaha soo socda iyo todobaadyada, taasi oo inoo hoggaamin doonta in aad gudbino codsigeena rasmiga ah Golaha Waxbarashada dhammaadka bishan. Wixii intaas ka dambeeya, waxa aan rajeyneynaa sidii loo hirgalin lahaa loona ballaarin lahaa barnaamija, gudo-galka iyo dadaalada dhammaan ardayda dugsiyada degmada.

Daacadnimo,

Guadalupe Guerrero
Guddoomiyaha Waxbarashada